



## Dardaaranada Daryeelka Caafimaadka

Waxaan ognahay in dhibaatooyika caafimaadka ay walaac saaid ah ku yeelan karaan xubnaha qoyska, gaar ahaan haddii bukaanku uusan awoodin inuu hadlo. Dardaaranka daryeelka caafimaadka wuxuu noqon karaa xog qiimo badan oo hoos u dhigta isku dhexyaaca qoysaska iyo go'aanada aadka u adag. Wuxuu gacan ka geysan karaa in qoyskaaga fahmaan qiimahaaga iyo waxyaabaha aad aaminsan tahay iyo inay ku siiyaan daryeelka ugu habboon inta lagu jiro waqtiga adag.

### Sidee u abuuri kartaa dardaaranka daryeelka caafimaadka?

Sharciga Minnesota wuxuu kuu oggolaanayaa inaad daryeelka caafimaadka ee aad jeceshahay la wadaagto dadka kale. Waxaad dardaaranka daryeelka caafimaadka u adeegsan kartaa inaad ku qorto waxyaabahaan aad jeceshay ama inaad ku magacoowdo qofka kuu gaari doonaa go'aanadaan.

Noo sheeg haddii aad jeclaan lahayd inaad hesho xidh xog ah oo ku saabsan sida loo aburo dardaaranka daryeelka caafimaadka. Waxaan kaala hadli doonaa kahor qalliinka, waxaad arki doontaa macluumaad ku saabsan mawduuca foomka "Oggolaanshaha Qalliinka iyo/ama Baaritaanada waawayn". Midkiin adiga ama masuulkaaga sharciga ah ayaa saxiixi doona foomkaan kahor qalliinka.

>> Eeg dhinac kale


## Yaa kuu hadli doonaa haddii aadan hadli karin?

Haddii aad haysato dardaaran daryeel caafimaad, usoo qaado xarunta qalliinka waxaan ku dari doonaa diiwaanka caafimaadka elektarooniga ah ee CentraCare. Fadlan faham in Inaanan xaq u lahayn inaan haysano codsigaaga Diidmada Tallaabooyinka Daryeelka (Do-Not-Resuscitate, DNR)/Diidmada in qofka lagu xiro aalada neefta (Do-Not-Intubate, DNI) haddii aad haysato. Diiwaankaaga xarunta qalliinka bukaan socodka waxaa ku qoran inaad u dulqaadan doonto habraacyada ku degsan goobtaan ayadoon la imaan wax dhibaato ah. Waa lagula tacaali doonaa waxaana laguu gudbin doonaa isbitaal haddii caafimaad ahaan u dulqaadan wayso.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan dardaaranada daryeelka caafimaadka, wac dhakhtarkaaga, qareenkaaga ama Guddiga Minnesota ee Laynka Dadka Duqowda ah oo laga wici karo lambarkaan 800-333-2433.

Waxaad ka heli kartaa macluumaadka dardaaranka daryeelka caafimaadka iyo foomam luuqado kala duwan oo onlaynka ah ku qoran barta [centracare.com/about-us/advance-care-planning-acp/](https://www.centracare.com/about-us/advance-care-planning-acp/)

**Iskaan garee koodhka QR si aad u hesho foomamka Dardaaranka Daryeelka Caafimaadka Minnesota oo ku qoran luuqado kala duwan.**



[CentraCare.com](https://www.centracare.com)